# حقوق الشباب ووجباتهم

## Xuquuqda dhalinyarada iyo waajibaadkooda

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ku yiri:

{ إِنَّـهُمْ فِتْيَةٌ آمَنُوا بِرَبِّهِمْ وَزِدْنَاهُمْ هُدًى}

**(Waxay ahaayeen dhalinyaro rumeeyay rabbigooda, waxaanna u siyaadinay hanuun)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Xilliga dhalinyarnimada waa xilliyada ugu muhimsan da'da aadnaha, waa xilliga awoodda jirka iyo bislaanshaha iyo firfircoonaanta iyo deeqda iyo rajada ballaaran iyo nolol raadinta, waxaan shaki ku jirin dhalinyarada inay yihiin tiirka umadda iyo wadnaheeda dhaqdhaqaaqaya iyo garabkeeda xoogga leh, qof dafirayo ma jiro kaalintooda muhimka ah dhisidda dalalka iyo hormarka umadaha iyo korreyntooda.

Qur'aanka kariimka wuxuu ka hadlay marxalada dhalinyarnimada inay tahay marxalad awood oo u dhexeysa labo marxaladood oo tabaryari ah, tabaryarida ilmanimada iyo tabaryarida duqnimada, wuxuu yiri Alle:

**{اللَّهُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ ضَعْفٍ ثُمَّ جَعَلَ مِنْ بَعْدِ ضَعْفٍ قُوَّةً ثُمَّ جَعَلَ مِنْ بَعْدِ قُوَّةٍ ضَعْفًا وَشَيْبَةً}**

(**Alle waa kan idin ka abuuray tabaryari, haddana idinka yeelay tabaryari kadib xoog, haddana xoog dabadii idinka yeelay tabaryari iyo gabow**).

Sidaa awgeed nabinimada iyo risaalada waxay soo dagayeen xilliga dhalinyarnimada, wuxuu yiri Alle asoo ka sheekaynaya nabi Yuusuf - nabadgelyo korkiisa ha haatee -:

**{وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُ آتَيْنَاهُ حُكْمًا وَعِلْمًا وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ}**

(**Markuu gaaray xooggiisa ayaan siinnay xukun iyo cilmi saasaana ku Abaalmarinaa samafalayaasha**), wuxuu yiri asoo ka hadlaya sayidkeena Muusa - nabadgelyo korkiisa ha haatee -:

**{وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُ وَاسْتَوَى آتَيْنَاهُ حُكْمًا وَعِلْمًا وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ}**

(**Markuu gaaray xooggiisa oo ekaaday ayaan siinnay xukun iyo cilmi, saasaana ku abaalmarinaa samafalayaasha**).

Wuxuu yiri Ibnu Cabbaas -Ilaahay raalli haka noqdee -: (**Ilaahay nabi masoo dirin asoo dhalinyar ah mooyee, caalimna cilmi lama siinin asoo dhalinyar ah mooyee**),

waa kanaa khaliilu Arraxmaan - nabadgelyo korkiisa ha haatee - oo ka hortagay kuwa sanamyada caabudayay asoo dhalinyar ah, wuxuu yiri Alle:

{قَالُوا سَمِعْنَا فَتًى يَذْكُرُهُمْ يُقَالُ لَهُ إِبْرَاهِيمُ}

(**Waxayna dheheen waxaan maqalnay wiil sheegaya lana dhaho Ibraahim**).

Sidoo kale Quraanka wuxuu tilmaamay caqliga iyo maskaxda sayidnaa Sulaymaan - nabadgelyo korkiisa ha haatee - asoo dhalinyar ah, wuxuu yiri:

{فَفَهَّمْنَاهَا سُلَيْمَانَ وَكُلًّا آتَيْنَا حُكْمًا وَعِلْمًا}

(**Waxaanna fahansiinnay sulaymaan, dhammaanna waxaan siinay xukun iyo cilmi**).

Waa kanaa nabigii Ilaahay Muusa - nabadgelyo korkiisa ha haatee - asoo ku sugan horraanta dhalinyarnimadiisa iyo awooddiisa iyo amaanadiisa oo keentay inay ka hadasho gabadhii uu dhalay ninkii suubanaa, siduu Quraanka ku sheegay oraahda Alle:

{قَالَتْ إِحْدَاهُمَا يَا أَبَتِ اسْتَأْجِرْهُ إِنَّ خَيْرَ مَنِ اسْتَأْجَرْتَ الْقَوِيُّ الْأَمِينُ}

(**Waxayna tiri middood aabbow noo ijaar, illeen waxaa u khayr roon cid la ijaarto mid xoog badan oo aamin ah**)

Wuxuu la hadlay Alle sayidkeena Yaxye - nabadgelyo korkiisa ha haatee - si uu ugu istaago amaanada cilmiga

iyo culeyska dacwada qaab xoog iyo go'aanka dhalinyarnimada leh, wuxuu yiri Alle:

**{يَا يَحْيَى خُذِ الْكِتَابَ بِقُوَّةٍ وَآتَيْنَاهُ الْحُكْمَ صَبِيًّا}**

(**Yaxyow ku qaado kitaabka xoog (dadaal) waxaan siinnay xukun isagoo yar**).

Xilligan muhimadda uu u leeyahay cimriga aadanaha dartii wuxuu caddeeyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - in Ilaahay uu weyddiin doono addoonka su'aal gaar ah maalinta qiyaame si uu ugu dadaalo qofka inuu ka faa'ideysto kana qaniimaysto wixii faa'idadiisu ay kusoo noqonayso isaga iyo dadka, wuxuu yiri rasuulka:

**(لنْ تَزُولَ قَدَما عبدٍ يومَ القيامةِ حتى يُسْأَلَ عن أَرْبَعِ خِصالٍ : عن عُمُرِهِ فيمَ أَفْناهُ؟ وعَنْ شَبابِه فيمَ أَبْلاهُ؟ وعَن مالِهِ من أين اكْتَسَبَهُ ، وفيمَ أنْفَقَهُ؟ وعَنْ علمِهِ ماذا عمِلَ فيهِ؟)**

(**Addoonka labadiisa cagood ma suulayaan maalinta qiyaame ilaa laga weyddiiyo afar waxyaabood: cimrigiisa muxuu ku dhammeeyay? Dhalinyarnimadiisa muxuu ku baabi'iyay? hantidiisa intuu ka keenay xaggee buuna ku bixiyay? Aqoontiisa muxuu ku sameeyay?)**.

Islaamka aad buu ugu dadaalay dhalinyarada, wuxuu u yeelay xuquuq wuxuuna dusha ka saaray waajibaad, waxay leeyihiin xaqqa waxbarashada iyo hagidda iyo hab wanaagsan in loo diyaariyo, Quraanka kariimka

wuxuu sheegay wixii dhexmaray Luqmaan Alxakiim - nabadgelyo korkiisa ha haatee - iyo wiilkiisa, wuxuu ku abuuray diinta wuxuuna ku boorriyay hagaajinta iyo siismada iyo akhlaaqda wanaagsan in la qaato, wuxuu yiri Alle:

**{وَإِذْ قَالَ لُقْمَانُ لِابْنِهِ وَهُوَ يَعِظُهُ يَا بُنَيَّ لَا تُشْرِكْ بِاللَّهِ إِنَّ الشِّرْكَ لَظُلْمٌ عَظِيمٌ }**

(**Xusuuso markuu ku yiri Luqmaan wiilkiisa isagoo waanin wiilkayow Alle hala wadaajinin, shirkigu waa dulmi weyne**)

Wuxuu yiri Alle subxaanahu:

**{يَا بُنَيَّ إِنَّهَا إِن تَكُ مِثْقَالَ حَبَّةٍ مِّنْ خَرْدَلٍ فَتَكُن فِي صَخْرَةٍ أَوْ فِي السَّمَاوَاتِ أَوْ فِي الْأَرْضِ يَأْتِ بِهَا اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ * يَا بُنَيَّ أَقِمِ الصَّلَاةَ وَأْمُرْ بِالْمَعْرُوفِ وَانْهَ عَنِ الْمُنكَرِ وَاصْبِرْ عَلَى مَا أَصَابَكَ إِنَّ ذَلِكَ مِنْ عَزْمِ الْأُمُورِ * وَلَا تُصَعِّرْ خَدَّكَ لِلنَّاسِ وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرَحًا إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ * وَاقْصِدْ فِي مَشْيِكَ وَاغْضُضْ مِن صَوْتِكَ إِنَّ أَنكَرَ الْأَصْوَاتِ لَصَوْتُ الْحَمِيرِ}**

(**Wiilkayow hadday xumaantu tahay xabbad khardal ah oo kale (wax yar) oo sallax dhexdii ku sugnaato ama samooyinka dhexdooda ama dhulka dhexdiisa wuu keeni Alle, Ilaahayna waa oge xeeldheer * Wiilkayow oog salaadda, oo far waanaagga oo reeb waxa la naco kuna samir waxa ku gaara, arrintaasu waxay ka mid tahay umuuraha wanaagsane * Hana ka jeedin wajiga dadka hana ugu socon dhulka kibir, Alle ma jecla mid kastoo islaweyn oo faan badan * socodkaagana ku**

**dhexdhexayso, hoosna u dhig codkaaga, cod waxaa ugu xun codka dameerahee**).

Sidaan ayuu ku sameyn jiray nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - dhalinyarada aad buu ugu dadaali jiray, wuxuu ku dadaali jiray diyaarintooda wuxuu ku abuuri jiray quluubtooda iyo caqligooda mabaadi'da diinta ee waaweyn iyo jacaylka cilmiga iyo darajada sare, waxaa laga wariyay Ibnu Cabbaas -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: maalin ayaan nabiga gadaashiisa saarnaa wuxuu yiri:

**(يَا غُلاَمُ ، إِنِّي أُعَلِّمُكَ كَلِمَاتٍ ؛ احْفَظِ اللَّهَ يَحْفَظْكَ ، احْفَظِ اللَّهَ تَجِدْهُ تُجَاهَكَ ، إِذَا سَأَلْتَ فَاسْأَلِ اللَّهَ ، وَإِذَا اسْتَعَنْتَ فَاسْتَعِنْ بِاللَّهِ ، وَاعْلَمْ أَنَّ الأُمَّةَ لَوْ اجْتَمَعَتْ عَلَى أَنْ يَنْفَعُوكَ بِشَيْءٍ لَمْ يَنْفَعُوكَ إِلاَّ بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللَّهُ لَكَ ، وَلَوْ اجْتَمَعُوا عَلَى أَنْ يَضُرُّوكَ بِشَيْءٍ لَمْ يَضُرُّوكَ إِلاَّ بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللَّهُ عَلَيْكَ، رُفِعَتِ الأَقْلاَمُ وَجَفَّتْ الصُّحُفُ)**

(**Yarow waxaan ku barayaa ereyo, Ilaali waajibaadka Alle, wuu ku ilaalin, Ilaali Alle hortaada aad ka heshidee, markaad wax weyddiinayso Alle weyddiiso, markaad kaalmo rabto Alle kaalmeyso, ogow hadday umadda u kulmaan si ay wax kugu taraan kuuma tari karaan wax Alle kuu qoray mooyee, hadday u kulmaan inay ku dhibaan kuguma dhibi karaan wax Alle kuu qoray mooye, qalimaanta waa la qaaday warqadahana way qallaleen**).

Marka si fiican wax loo baro si suganna loo tababbaro waxay xaq u leeyihiin dhalinyarada in gacanta loo geliyo shaqada iyo hoggaanka iyo mas'uuliyadda mid kaste aqoontiisa iyo awooddiisa intay la eg tahay, sidan ayuu sameeyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu meeleeyay awoodda dhalinyarada ee kala duwan wuxuu dhexgaliyay nolosha, dacwadiisa wuxuu ku aaminay dhalinyar aan gaarin laabatan sano, waa Al-arqam ibnu abii Al-arqam -Ilaahay raalli haka noqdee - kaasoo gurigiisa u ahaa xarun nabiga iyo asxaabtiisa sharafta badan bilowga dacwada Islaamka sidoo kale nabiga amiir ayuu uga dhigay Usaama bin Zayd -Ilaahay raalli haka noqdee - ciidanka muslimiinta, da'diisu waxay ahayd waqtigaas midaan dhaafin siddeed iyo toban sano.

Cumar bin Alkhaddaab -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu ugu yeeri jiray golihiisa dhalinyarada kuwaasoo ag fariisanaya odeyaasha, wuu kala tashan jiray arrimaha oo dhan, wuxuu dhihi jiray: (**midkiina yayna ka reebin yaraanta da'diisa inuu ra'yi dad kula taliyo, aqoonta kuma xirna da' yarida iyo weynidaba ee Alle meeshuu doono ayuu dhigaa**) golihiisa dhaliyar ayaa ku sugnaa waxaa ugu horreeyay Cabdullaahi bin cabbaas oo Cumar yiri asoo ka hadlaya: "**wuxuu leeyahay carrab su'aal badan iyo qalbi caqli badan**".

Arrinka kuma ekeyn dhalinyarada raga keliya, haweenka dhalinyarada ah waxay ku lahaayeen kaalin aan la dafiri karin sameynta xadaaradda Islaamka, kaalin ayay ku lahaayeen nabadda iyo dagaalka waxaa ka mid ahayd Asmaa bintu Abiibakar -Ilaahay raalli haka noqdee - iyo kaalinteeda ka muuqatay hijrada nabiga, waxay u diyaarin jirtay nabiga iyo aabbaheeda cuntada iyo cabbitaanka markay hijroonayeen, balse waxay lahaayeen kaalintooda waqtiyada ugu adag, goobaha dagaalka ayay ciidanka waraabin jireen waxay daaweyn jireen dhaawaca, taas waxaa ka mid ah maalinta Uxud wuxuu leeyahay Anas: "**waxaan arkay Caa'isha bintu Abiibakar -Ilaahay raalli haka noqdee - iyo Ummu Suleym -Ilaahay raalli haka noqdee - oo ku qaadaya dhabarkooda sibraarada kaddib ku shubaya dadka afkooda kaddib noqonaya soona buuxinaya kaddibna imaanaya oo ku shubaya dadka afkooda**".

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Waajibaadka dhalinyarada laga rabo way badan yihiin, **midda koowaad**: inay naftooda ku ilaaliyaan aqoon iyo waxbarasho joogto ah, aqoonta mar kaste way isbaddalaysaa, waxaa lagama maarmaan ah dhalinyaradeena inay la socdaan isbaddalada iyo dhacdooyinka iyo in la ilaaliyo goobta shaqada waxa ay u baahan tahay iyo baahida dalka, waa inay siyaadsadaan barnaamijyada iyo koorsooyinka tababbarka iyo qibradaha loo baahan yahay, si ay u noqdaan kuwa ka hortagi karo caqabadaha, Ilaahay ma farin nabigiisa in wax la siyaadsado oon cilmiga ahayn wuxuu leeyahay Alle asoo la hadlaya nabigiisa:

{وَقُلْ رَبِّ زِدْنِي عِلْمًا}

(**Dheh rabbiyow ii kordhi cilmi**).

**Midda labaad**: in lagu dadaalo ka faa'ideysiga qibradaha iyo in laga digtoonaado kibirka, waxaa ku habboon inay ka faa'ideystaan dhalinyarada khibrada iyo xigmadda dadka ka horrreeyay, xiriirka ka dhexeeya jiilasha iska daba imaanayo ma aha xiriir fogeyn ku dhisan ama loollan, waa xiriir ku dhisan iskaashi iyo isu nasteexeyn haka digtoonaadaan dhalinyaradeena kibirka oo wax duminaya oon wax dhisaynin oo qofkiisa halaagaya, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرَحًا إِنَّكَ لَن تَخْرِقَ الْأَرْضَ وَلَن تَبْلُغَ الْجِبَالَ طُولًا}**

(**Hana ugu soconin dhulka kibir illeen ma jeexi kartid dhulka kumana gaaraysid buuraha dherere**)

Wuxuu leeyahay nabigeena:

**(ثَلاثٌ مُهْلِكَاتٍ: شُحٌّ مُطَاعٌ، وَهَوًى مُتَّبَعٌ، وَإِعْجَابُ الْمَرْءِ بِرَأْيِهِ)**

(**Seddex waxbay halaagaan: bakhaylnimo oo loo hoggaansamo iyo hawo la raaco iyo qofka aragtidiisa inuu la dhaco**).

**Midda seddexaad**: cusbooneysiinta niyadda si diinta iyo dalka loogu adeego, qofka waxaa laga abaalmariyaa ikhlaaskiisa iyo dhabta niyaddiisa intay la eg yihiin, wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(إِنَّمَا الأَعْمَالُ بِالنِّيَّاتِ ، وَإِنَّمَا لِكُلِّ امْرِئٍ مَا نَوَى ...)**

(**Camalka waa niyadda, qof kastena waxaa u sugan wuxuu niyaysto…**).

**Midda afaraad**: in laga faa'ideysto fursada oo dadaal badan la bixiyo lana ogaado inay waddada dheer tahay amaanada culus tahay, maxaayeelay waxaan ku nool nahay bulsho aad u degdegeysa, boos kuma laha dadka aan cusbooneysiin karin camalkoodana si fiican aan u qaban karin iyo shaqooyinka loo xilsaaray, saan u xaqiijino rabitaankeena oo aan u gaarno meesha aan u rajeynayno nafteena iyo dalkeena waxaa lagama maarmaan ah inaan ku bixino awoodda iyo dadaalka ugu sarreeya.

**Midda shanaad**: in loo mahad noqo dalka oo wax barbaariyay waxbarasho bixiyay oo suurtagaliyay, waddanka xaq ayuu ku leeyahay dadkiisa ku nool carradiisa, kuna barbaaray khayraadkiisa xusuustooda iyo taariikhdoodana ku sugan, ha ahaado saadkeena go'aan iyo sii wadid hubkeenana ha noqdo aqoon iyo halabuur, astaanteenana ha ahaato sheegasho iyo siismo annagoo u adeegeyno dalkan carradiisana difaacayno.

**Ilaahyow noo barakeey dhalinyaradeena, kana ilaali xumaan kaste, waafaji dhista iyo camiraadda, kuna hanuuni wixii wanaagga dadka iyo dalka ku jiro masarteenana noo ilaali iyo dhamaan dalalka caalamka.**